

Digniin: Kaniiniyo Been abuur ah oo Halis ah oo Daawada La isku qoro ah ayaa laga helay Ohio

Kaniiniyada been abuurka ah/feega ah ee u eg kaniiniyada alprazolam (Xanax®) iyo oxycodone (Oxycontin®) ayaa lagu iibinaya Ohio. Waxaa ku jirta maadada fentanyl, oo ah daawo xooggan oo lagu dhiman karo, iyo maadooyin kale oo sababi kara dhimasho.

Calaamadaha lambarada iyo xarfaha, midabyada, iyo cabirada ku qoran kaniiniyada been abuurka ah ayaa ka dhigaaya kuwo u eg kaniiniyada runta ahaa/sharciga ahaa. Waa wax aad u adag inaad araga caadiga ah ku kala saarto kaniiniyadaan.

Kaniiniyada been abuurka ah **maaha** kuwo ay bixiyaan dhakaatiirta caafimaadka ee ruqsada leh. Badanaa waxaa lagu iibshaan oonleenka baraha bulshada ama webseedyada "suuqa madoow" ee qarsoon waxaana si gacan ka gelis ah isku dhaafsada iibiyaal sheeganaaya inay yihiin kaniiniyo sax ah iyo dadka iibsanaaya.

MARNA ha ka qaadan kaniini ama daawo dhakhtar qoro oon kasoo bixin adeeg bixiye caafimaad oo ruqsad leh.

Ogoow: Heerarka daawooyinka loo dhinto ayaa kala duwan hadba kaniiniga aad markaas cunayo, xataa haddii ay ku jiraan isku baakad. Haddii aad haysto kaniiniyo aadan kasoo qaadan adeeg bixiye caafimaad oo ruqsad leh, HA cunin daawadaas mar danbe.

Astaamaha muujinaaya in kaniini yahay mid been abuur ah:

- Kaniiniyadu kama iman adeeg bixiye caafimaad oo ruqsad leh.
- Kaniiniyadu kuma jiraan baakad uu dhakhtar kuu qoray (sida dhalada kaniiniyada ee magaca qofka loo qoray ku qoran yahay).
- Kaniiniyada waxaa loo iibiyaa mid mid ama cadad yar oo qayru caadi ah.
- Kaniiniyada waxaa lagu iibshaan cadad aad u badan oo qayru caadi ah.

Badanaa waa wax dhib badan in la go'aansho haddii kaniini uu sharci yahay ama been abuur yahay. Hoos waxaad ka helaysaa tusaalayaasha.

Alprazolam/Xanax®

Nooca been abuurka ah ee kaniiniyada alprazolam iyo Xanax® ayaa lagu qabtay Ohio.

Kaniiniyo sharci ah	Kaniiniyo been abuur ah	Eray suuqeedka badanaa loo adeegsado	
	Kaniini cagaaran oo sumadiisu tahay S 90 3.		Zannies
	Kaniini buluug ah oo sumadiisu tahay B 707.		Bars
	Kaniini cad oo sumadiisu tahay G 372 2.		Hulks
	Kaniini jaalle ah oo sumadiisu tahay R 039.		Ladders
	Kaniini cad oo sumadiisu tahay XANAX 2.		

Oxycodone/OxyContin®

Kaniiniyada been abuurka ah ee M 30 iyo A 215 oxycodone ayaa lagu qabtay Ohio.

Kaniiniyo sharci ah	Kaniiniyo been abuur ah	Eray suuqeedka badanaa loo adeegsado	
	Kaniini buluug ah oo sumadiisu tahay M 30.		Oxy
	Kaniini buluug ah oo sumadiisu tahay A 215.	Lagama hayo wax sawir ah.	Roxy 30s

Fentanyl waa qandho jebiye kamid ah opioid kaasoo keeni kara dhibaatooyinka neefta oo xun ama dhimasho marka la iska badiyo.

Astaamaha aad iska eegayso

Astaamaha soo socda ayaa noqon kara calaamad muujinaya in adigga ama qof aad taqaano uu iska badiyay daawada Fentanyl ama daawo kale oo opioid ah:

- Dhaqdhaqaq la'aan/miyir daboolmid ama suuxid.
- Inaad neefsan waydo ama neeftu cariiri noqoto.
- Bishimaha iyo cidiyaha oo yeesha midab khaldan.
- Saxasho ama qufac.
- Maqaar qaboow ama dhadsan.
- Bu'da indhaha oo aad u yaraada.
- Dawakhsanaan ama kala daadsanaan.

Sida aad gacan u gayasan karto

Naloxone, oo sidoo kale loo yaqaano NARCAN®, waa daawo baabi'in karta dhibaatada ka dhalata opioid ka la iska badiyay waxayna badbaadisaa nafta ayadoo xanibaya saamaynada opioid ka gaartay maskaxda si degdeg ahna usoo celinaya neefta. Naloxone waa daawo badqab leh: Haddii la siiyo qof aan cunin opioid wax dhibaato ah ma keenayo, khubarada caafimaadka degdega ah ayaana isticmaalaayay naloxone in ka badan 40 sano.

Fadlan ogoow: naloxone maaha daawo aad adigu iskaa u cuni kartid.

Haddii aad aaminsan tahay in adigga ama qof kale uu ku jiro khatar degdeg ah, wac 911.

Dhibaato miyaad ku jirtaa? Wac 1-800-662-HELP (4357) ama erayga "4HOPE" fariin qoraal ugudir 741741.

Haddii aad marqaati ka ahayd qof iska badiyay daawada, markasta codso caawimaad, xataa haddii aad ka baqayso in lagu xiro. Sharciga Good Samaritan ee Ohio ayaa ku difaacaaya asagoo u sahlaaya heerar kaladuwan oo xasaanad ah dadka waca 911 marka qof iska badiyo daawada.

Waxaa soo saaray:



Department of Health



Talooyin Dheeraad ah

Ku socota adeeg bixiyaasha caafimaadka

Sabab la xariirta inay kordheen kaniiniyada been aburka ah ee ay ku jirto maadada fentanyl iyo maadooyin kale oo ay suuragal tahay inay dhimasho keenaan, Waaxda Caafimaadka Ohio waxay bixinaysaa talooyinkaan ku socda shaqaalaha gurmadka degdega ah, adeeg bixiyaasha caafimaadka, xirfadlayaasha daawaynta isticmaalka maandooriyaha, Mashruuca barnaamijyada DAWN ee deegaanka (Uga hortagida Geerida daawada Naloxone), iyo dadka kale ee la shaqeeya dadka adeegsada maandooriyasha.

Ka caawi shaqsiyaadka helitaanka iyo qaadashada daawada

Naloxone

Ku dhiiri geli bukaanada/macaamiisha adeegsada maandooriyasha, iyo sidoo kale ehelkooda iyo asxaabtooda, inay qaataan daawada Naloxone. Ku xir dadka mashruuca deegaanka ee barnaamijka waxbarashada iyo bixinta Naloxone ee bulshada ama ku xir farmashiyaha maxaliga ah oo bixiya Naloxone. Xog dheeraad ah oo ku saabsan meesha laga heli karo Naloxoneayaad ka helaysaa www.odh.ohio.gov/projectdawn. Naloxone waxaa sidoo kale laga helayaa inta badan farmashiyaasha Ohio ayadoon dhakhtar kuu qorin. Liiska farmashiyaasha Ohio ee baxsha Naloxone ayaa laga heli karaa barta www.pharmacy.ohio.gov/stopoverdose.

Sii Naloxone qofka iska badiya daawada marka looga shakiyo/ lagu arko daawooyinka aan ahayn opioid

Inkastoo Naloxone aysan waxtar badan u lahayn daawaynta iska badinta daawada ee keliya ka timaada daawooyinka marqaanka sida kookeenta iyo methamphetamines, cunista naloxone ayaa faa'iido u yeelan karta ciladaha daawooyinka la iska badiyay ee ka kooban isku darka maadooyinka marqaanka iyo opiod yada sida fentanyl iyo faracyadeeda.

Bar bukaannada/macaamiisha adeegsada maandooriyasha khataraha daawooyinka lagu qasay fentanyl ay keenaan

Ku adkee khatarta dheeraadka ah ee ay leedahay iska badinta daawada iyo in loo dhiman karo. Qodobada muhiimka ah ayaa laga heli karaa godka xigga. Xog aad la wadaagi karto xubnaha bulshada ayaa sidoo kale laga heli karaa www.OHAgainstOD.ohio.gov.

Khataraha ay keeni karaan maandooriyasha lagu qasay fentanyl

- Fentanyl waxaa badanaa lagu qasaa daawooyin kale ayadoo uusan ogayn isticmaaluhu.
- Fentanyl ayay u badan tahay in loo dhinto sabab la xariirta awoodeeda saraysa iyo mudada dheer ee ay jirka ku jirto.
- Iska ilaali isku qasida daawooyinka (ayna ku jirto khamradu), taasoo kordinaysa khatarta iska badinta daawada.
- Ha adeegsan daawooyinka adoo keligaa ah, si uu qof kale kuu caawiyo/caawimaad kuugu dalbo haddii aad iska badiso daawada.
- Oofka daawooyinka cunaaya iyo sidoo kale ehelada iyo asxaabta waa in dhammaantood la baraa calaamadaha iyo astaamaha daawada la iska badiyay, meesha ay ka helayaan naloxone, sida ay u isticmaalayaan, sida loo sameeyo neef badbaadinta, iyo muhiimada in degdeg loo waco 911, xataa marka qofka la siiyo naloxone.
- Haka tagin aanbalaasta ama isbitaalka adoo diidaaya talada caafimaadka kadib marka lagu siiyo naloxone si lagaaga daaweyyo iska badinta daawada. Naloxone ayaa kaa bixi karta kahor intaysan opioid ka dhamaan jirka - waxaadnaa geli kartaa suuxdinta iska badinta daawada markale, adoo luminaaya miyirka neeftuna kugu yaraato ama kaa istaagto.

Ilo xog bixiyaal dherraad ah

- Miami Valley Regional Crime Lab.
- Ohio State Highway Patrol Crime Lab.
- Lake County Crime Lab.
- Columbus Division of Police Crime Lab.
- Ohio Bureau of Criminal Investigation Drug Chemistry Unit.

Adeegyada caafimaadka isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka habdhaqanka

Adeeg bixiyaasha caafimaadka ayaa ka caawin kara inay bukaannada/macaamiisha adeegsata maandooriyasha ku xiraan daawaynta, ama dadka reer Ohio ayaa wici kara laynka gurmadka ee Ohio Department of Mental Health and Addiction Services oo bilaash looga wici karo 1-877-275-6364, lana heli karo 8 g.h.- 6 g.d. Isniinta ilaa Jimcada.

The local alcohol, drug addiction and mental health services board (ADAMH, Waaxda Maxaliga ah ee adeegyada Khamriga, maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka ee maxaliga ah) oo ka shaqeeya deegaankaaga ayaa sidoo kale ku xiri kara dadka Ohio adeegyada caafimaadka habdhaqanka oo qiimo jaban. Ka fiiri golaha ADAMH ee deegaankaaga barta www.mha.ohio.gov/wps/portal/gov/mha/community-partners/adamh-boards.

Ohio CareLine, ood ka wacayo 1-800-720-9616, ayaa baxsha adeegyada 24/7 oo lagu helaayo xirfadlayaasha caafimaadka habdhaqanka oo tababarhan kuwaasoo ku siin kara taageero qarsoodi ah markaad gasho dhibaatooyin shaqsii ah ama kuwo qoyska ah marka shaqsiyaadku la daalaa dhacayaan la qabsiga caqabadaha ka haysta noloshooda. Marka dadka adeegga wacaaya u baahan yihiin adeegyo dheeraad ah, waxay helayaan caawimaad iyo in lagu xiro adeeg bixiyaasha maxaliga ah.

Dadka reer Ohio ayaa sidoo kale ka helaaya adeeg bixiyaasha caafimaadka habdhaqanka barta www.findtreatment.gov.

Ilaha dheeraadka ah

- Xog ku aadan qaadashada naloxone, oo ay ku jirto inaad ku dalbato boostada:www.odh.ohio.gov/wps/portal/gov/odh/know-our-programs/project-dawn/project-dawn-programs.
- [U.S. Drug Enforcement Agency \(DEA\) One Pill Can Kill:](http://www.dea.gov/onepill) www.dea.gov/onepill.
- [War saxaafadeedka DEA ee ku aadan kaniiniyada been abuurka ah:](http://www.dea.gov/press-releases/2021/09/27/dea-issues-public-safety-alert) www.dea.gov/press-releases/2021/09/27/dea-issues-public-safety-alert.